



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, TiếngViệt la soo geliyay: <https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Febraayo 15, 2021

Ku socota: Daryeel Bixiyayaasha iyo Hawl wadaagayaasha
Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS)
Ujeedada: Is xasuusinta siyaasada maaskaraha iyo tilmaamaha ODDS

Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) ayaa ku dhawaaqay toddobaadkan in Oregon meesha ka saari doonto shuruudihii maaskaraha ee guud ee loogu talagalay goobaha dadweynaha ee gudaha ku yaala muddo aan ka dambeyn Maarso 31, 2022.

Shuruudihii maaskaraha ee loogu talagalay Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS) ayaa sii jiri doona ka dib Maarso 31.
[Tilmaamaha dib u furitaanka](#) ayaa leh faahfaahin buuxda.

Maaskaraha ayaa sii socon doonta in la iskaga baahdo marka la bixinayo daryeel loogu talagalay qof ku jira goobaha soo socda:

- Daryeelka guriga dadka waayeeleka ah (daryeel bixiyayaasha ku nool goob guri ah oo wax lagu daryeelo halkaasi oo adeegyada laga bixiyo aan la iskaga baahnayn in la xirto maaskaro.)
- Guryaha koox ahaanta loo degan yahay 24-ka saacadood, oo ay ku jiraan guryaha Kooxda Xasilinta Dhibaatooyinka (SACU)
- Nollosha la taageero
- Taageerada kooxda maalintii iyo adeegyada shaqada
- Adeegyada guriga-dhexdiisa oo ay ku jiraan shaqaalaha taageerada shakhsiyeed (PSW-yada)

Haya'daha maamulka kiiska, daryeel bixiyayaasha iyo dadka soo booqanayaa waxaa looga baahan yahay in ay xirtaan maaskare marka ay booqanayaan goobo ODDS ruqsad siisay.

OHA ayaa xustay in xirashada maaskaraha si adag loogula talinayo dadka aan tallaalnayn, ee da'doodu ka weyn tahay 65, dadka difaaca jirkoodu liito ama halista sare ugu sugan in ay qaadaan fayraska xaalado caafimaad awgeed.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.